Telegramka @somalibooks

Dilaaga Dahsoon

Wq: Maxamuud Axmed Maxamed (Maxamuud Orshe)

Wt: Cawil Cabdulqaadir Cismaan (Cawil Ciiro)

14kii Augost 2014

Garoowe, Soomaaliya

Telegramka @somalibooks

Hordhac:

Maanta Warbaahinta Soomaaliyeed marka aad eegto waxaa qodobadda safka hore kaga jira noqdey kuwan; **(1)** ***Dagaal dhexmaray reer qansax iyo reer qurac ayaa boqolaal ku dhinteen, tiro intaa ka badanna waa ay ku dhaawacantay iyadoo ay halkaas ka qaxeen tiro farabadan oo dadka deegaamadaas ku noolaa ah… (2) Boqolaal carruur ah ayaa gaajo iyo harraad ugu dhintay gobollada Soomaaliyeed iyadoo caddad intaa ka badan ay macaluul ku hayso goboladaas… (3) Beelaha reer maygaag ayaa bayaan ka soo saaray shirkii maanta, sheegayna in aan loo dhammeyn, uguna baaqay madaxweynaha inuu xilka iska casilo… (4) Gaari laga soo buuxiyay waxyaabaha qarxa ayaa waxaa lala beegsaday arday Soomaaliyeed xilli ay xaflad qalinjabin ah ku dhexjireen…. (5) Haammo aan la garanayn waxa ku jira ayaa ka soo caariyay xeebta iyadoo cuduro aan la garanayn ay la il daran yihiin dadka deegaanku… (6) Dooni ay saarnaayeen dhawr boqol oo Soomaali ah ayaa ku degtay badda u dhexaysa talyaaniga iyo libiya, ama Somaliya iyo yeman … (7) kooxo hubaysan ayaa xalay koonfur Afrika ku boobay dukaamo ay ganacsato soomaaliyeed leeyihiin, ama keenya iyo Sacuudiga ayaa ka tarxiilay dalkooda kumaanaan Soomaali ah; qaar kalena xabsiyada u taxaabay.***

Hadalladaas iyo kuwo badan oo la mid ah ayaa maanta ka jira dhulka Soomaaliyeed, isla markaana caado u noqday in ay maqlaan dhegaha quusta taagan ee ummadda Soomaaliyeed, Waa yaabe, ***maxaa uu yahay cudurka nadaashaday, damiirkii iyo dadnimadii dadka Soomaaliyeed dulleeliyay, oo daadxoorta ka dhigay; isla markaana dilaaga ah?*** Waa su'aal xilkeed mudan

Dhanka kale, sida la ogsoonyahay, dunida waxaa maanta ka jira, isla mar ahaantaana caan ka ah xannuuno fara badan oo qofka Aadanaha ah ku xukuma dhimasho, dawadoodana aan ilaa iyo hadda wax rasmiya laga hayn. Haddaba, marka laga soo tago dunida kale Ummadda Soomaaliyeed oo ah qowmiyad ku nool Gobolka geeska Afrika, laguna qiyaaso tiradooda 10 milyan, waxa ay ka siman yihiin Af, Diin iyo iyagoo qowmiyad ahaan muuqaalka kaga duwan Afrikada kale. Laakiin, sida uu tilmaaamayo magaca maqaalkan, waxa muuqata in uu jiro dilaa dahsoon oo ku xukumay ummadda Soomaaliyeed dil oo aysan ilaa hadda iska garan, sida lagu yaqaan cudurada dunida ka jira, ayna ka mid ka yihiin; "Dhiig karka, sokorta, Kanserka iyo cudurka caanka ah ee HIV AIDska

Waa Maxay Dilaaggan Dahasoon?

Sida aan horey ku soo xusay, shaqsi waliba marka uu maqlo su'aashan ama la waydiiyo waxa uu isla markiiba ka fekarayaa cudur ka mid ah cuduradda dilaaga ah ee aad looga cabsado tusaalle ahaan cudurka AIDSka oo sida ay qorayso warbixin ay soo saartey UNAIDS (2012), 30kii sano ee la soo dhaafay dunida caan ka noqday, kaas oo ku dhacay dad kor u dhaafay 60 milyan oo ilaa iyo hadda ay u dhinteen dad gaaraya 30 Milyan. Balse Nasiib darro, iyadoo uu Cudurkaasi iyo cudurada kale ee la midka ah ay dhankiisa ka jarayaan, ayna daryeel la'aan caafimaad uu ku heley ummadda Soomaaliyeed gabi ahaanteedba, Hormo iyo hayb kasta oo sheegata, waxaa si

Telegramka @somalibooks
la mid ah dhiiggooda ku saaqay oo degay qalbigooda, cudur kale oo dilaa ah, kana dhigay kuwa ka haray dunida Aadmigu uu u baratamayo una kala dheeraynayo hantinta nasiibkii uu Alle dunidan ugu qoray.

Inkastoo qof walba marka uu maqlo Jawaabta su'aasha inoo taalla, ay tahay mid aan ku cusbayn, haddana cudurkan dilaaga ah ee ina indho tiray, laayey dadkii Soomaaliyeed, iyagoo boqolaal kun kor u dhaafaya, in le'egna ka barakiciyay wadankoodii hooyo, waa ***QABYAALAD***.

Cudurkan qabyaaladdu waa midka inaggu kalifay meel uu Islaamku kasoo hayaamay dhawr iyo toban qarni horteed in aan dib ugu laabanno, cudurkani waa kan maskaxdii iyo maankiiba ka qaaday dadkii aannu bidaynay inay ummadda Soomaaliyeed ugu aqoon iyo itaalba roon yihiin, waa kan ka dhigay aqoonyahankii Cilmiga Maadiga ah iyo wadaadkii Diinta ee Soomaaliyeed inay ku raadiyaan mansab iyo dhiigga ummadda nooc kasta oo ay yihiin, waa midka keenay sidii xeyn xoolo ah oo isaggu leeyahay in uu ninba meel ku xareysto kooxda ay isku haybta sheegtaan, isaga oo ugu sheekeeyay, u tusiyayna qoladaas ninka kale Jabad-baaska ku xareystay inay awoowgood dileen, adduunkana ay kaga noolaan waayeen, yihiinna cadowgooda koowaad ee ay iska ilaaliyaan, waxa uu isla markaana u jeexay xadduud, calanna uga dhigay calaamad uu ku bedalay calankii buluugle ahaa, waxaa intaa sii dheer oo uu uga dhigay magac erayo ka kooban kuwo uu soo bowsaday oo aan sal ku lahayn Afka Soomaaliyeed iskuna qasan sida; ***Jabadbaasland, Qansaxland, Quracland, iwm***. Qabyaaladdu waa tan isaga oo uu ka digayo abwaankii Soomaaliyeed ee Cabdullahi Suldaan Timacadde uu yiri: ***"Dugsi Ma leh Qabyaaladi waxay dumiso Mooyaane".***

Sida Marar badan dhacda, Dad badan oo Soomaaliyeed marka ay arkaan dhibta ka jirta wadanka iyo sababta ka danbeysa ee ah qabyaaladda dhiigga iyo caqligii waxgaradkii ummadda Soomaaliyeed ka dhigtay mid aan waxna ku tooranayn; ayaa ay ku andacoodaan in uu yahay sababta qabiilka, iyada oo aan ogsoonahay in qabiilku uu san ahayn waxa dhibtu ka timi ee ay tahay sida loogu dhaqmay waayo, Eebbe Weyne (Subxaanahu Watacalaa) "waxa uu Aayad qur'aan kiisa ka mid ah ku yiri; "***Dadow waxaan idinka abuurney mid lab ah iyo mid dhadig ah xagooda (Aadan Caleyhi Salaan iyo Xaawa), idinkana dhignay Qaramo iyo Qabiillo si aad isugu aqoonsataan, kiina ugu karaamada badan Alle agtiisa waa kan ka cabsada, Allena Waa Ogaal badane gun og arimaha" (Xujuraat 49:13).***

Haddaba, haddii ay tahay sababta uu Eebbe Weyne ugu sameeyay dadka shucuub iyo Qabiilo in ay isku aqoonsadaan oo kaliya, Waxa halkaa ka muuqanaysa in ummadda Soomaaliyeed inta ay ku dhaqanka qabyaaladda iyo nin jeclaysiga u tahay caadada ay ku sugan yihiin Jahli iyo Mugdi, dariiqa xaqqa ahna ay ka lunsan yihiin, waana sida uu ka markhaati kacayo abwaanka Soomaaliyeed ee Timacade mar uu hal-abuurkiisa ku cabiray:

Hadaynaan xumaantiyo dilkiyo daynin kala qaadka
Dibaddaan ka joognaa sharciga daacadda Ilaahe
Danbarkeedu waa Jahannama iyo dogobkii naareede

Telegramka @somalibooks

Waxaana sidoo kale uu Cabdullaahi binu Cumar (Allah ha ka raali noqdee) uu ka weriyay Nabiga (Nabad-galyo iyo Naxariis Alle Korkiisa ha ahaatee) in uu khudbad ka jeediyay maalintuu Makka furtay isagoo yiri; ***"War dadow Alle waxa uu idinka kaxeeyay faankii iyo kibirkii Jaahiliyada iyo isku waynayntii Aabayaasha…"*** Taas oo muujinaysa Qureyshtu in ay ku dhaqmi jirtay QABYAALLADA muddo hadda laga jooggo 1500 sanno, laakiin ay ka guurtay xilligii Suubanahu (Nabad-galyo iyo Naxariis Alle Korkiisa ha ahaatee) ka gudbiyay oo u ka dhigay ummad gabi ahaanteedba ku abtirsata diinta islaamka.

Sida ka muuqata, taariikhda ay QABYAALLADU ka shaqayn jirtay qurayshta dhexdeeda, waxaa nasiib daro ah ummadda Soomaaliyeed oo sida lagu qiyaaso amaba ay tahayba 100% muslim ay dib ugu noqdeen wax diinta islaamku ka saartay mucaamalaadka bulshada oo ka tuurtay muddo laga joogo 15 qarni, oo ah meel aad u liidata inaggana reebtay dunidii sida uu ku cabirayo hal abuurkiisa abwaanka Soomaaliyeed ee Shube 2007dii

"Dadkaygow garasho xume
Haddaan nahay gobol ka mid ah
Geyiga aadmiga ku nool
Goor hore iyo waayo tegey
Halkii laga geeddi galay
Asaaggeen seben gudbeen
Maxaa galabta ina dhigay?"

Waa Su'aal muhim ah oo runtii cid walba oo Alle qalbi danqanaya siiyay ka gubanayso, sidoo kale abwaanku waxa uu ka dhawaajiyay in aan Soomaali ahaan nahay Aadmiga dunida ku nool qayb ka mid ah, isla markaasna isaga oo hadalkiisa sii wata waxa uu carabaabay in meesha aan ku suganahay maanta ay tahay meel waayoo hore asaageen ka guuray oo ka tagay; ***Jabad dulin baas ka baxay sida; Shillin, Gafane, Kudkude iyo Kutaan, ayna weheliyaan dugaag leystaan ah oo fiid iyo saqba xerada dhex taagan, sababtaasna looga guuray.***

Dhanka kale, Qabyaaladdani waa mida ina dhaxalsiisay midkii shalay ina dilayay, inaan maanta isaga oo ay ahayd in loo qabsado wax uu geystay aan ku soo dhawayno sacab iyo mashxarad oo waayahan danbe noqotay mid ay ku loolamaan shaqsiyaadka ku dul hardamaya ummadda Soomaaliyeed waana meesha Abwaanka Soomaaliyeed ee Maxamed Ibraahim Warsame **hadraawi** uu ka yiri isaga oo hal-abuurkiisa ku tilmaamay arintaas;

"Ganbo nimaan la soo bixin haddii, guulo lagu waabo
Markuu dhaawac geystaba haddii loo gargarateeyo
Isagoo cannaan lagu gudbiyo gaarran filanaaya
Giblo iyo haddii sacabbo lulan, loogu gogol-xaadho
Keligii inuu guurti yahay, maalintaa gunudye"

tixdan uu soo bandhigay Abwaan Hadraawi, waxa muuqata in dhawaanahan ay arrintani si waadax ah uga soo ifbaxday guddaha ummadda Soomaaliyeed, aadna moodid in garashada iyo

Telegramka @somalibooks

waxtarka hoggaanka Soomaaliyeed lagu qiimeeyo hadba caddadka dharka xardhan iyo caleemaha wata ee soo dhawaysa xilliga uu yimaaddo ama sii galbisa xilliga uu wadanka ka dhoofayo si uu waxaan dhihi karo danihiisa gaarka ah u soo qabsado, iyada oo isla mar ahaantaa uu shacabku noqdo mid karriinka loomariyo dufan been ah, sidii xilli aan aniga oo da'daydu aad u yarayd ayeeyaday iiga sheekaysay, "***in beri ay neef ri' ah oo ay wadaageen habar-dugaag ayaa waxaa cuntay dawaco oo iyana ka mid ahayd duulkaasi, laakiin iyadu ku kaliyaysatay, dawaco sida la sheegay markii ay cuntay ayay waxa ay afka u marmarisay goronyo huruda hilibka dufankiisii, si ay ugu raad gadato, hadhowna u hesho qiil ay tiraahdo goronyada ayaa cuntay neefkii, si kasta arrintu ha ahaatee, markii ay arrintu halkaa marayso ayaa waxaa laga war helay in neefkii la cunay, markaas ayaa dawaco oo ku talagashay awalba in ay ka baxsato dabinka, kuna rido goronyo, ay tiri; waxaa cuntay neefkii goronyo, iyadoo makhraati uga dhigaysa inay dufanka afka ku leedahay ka dibna ay sidaa arrinkii ku sii socday ilaa ugu danbeyntii la ogaaday khiyaamadii dawaco ku wanjashay goronyo".***

Haddaba haddaan u soo daadago dulucdiyo ujeeddada aan ka lahaa sheeko xariiradaas macnaha wayni ku jirto, oo ah kuwo inta badan carruurta xilligay yar-yar yihiin looga sheekeeyo, laakiin marka ay waynaadaan si waaqici ah ugu soo duxda, iyadii oo cid kale ay ka tahay jilayaal, Sidaa darteed waxaan maanta ka dheragsannahay in badan oo ku dhawaaqaysa inay dalka iyo dadka u shaqayn doonaan, madaxna u yihiin, ayna ku wataan danno gaar ah, hal-kudhigooduna yahay "***Qowda Maqashii oo waxna ha u qaban***" kuna kaliyaystaan hantidii ummadda, sida uu ku soo bandhigay aqoonyahanka, qoraaga Soomaaliyeed Saciid Ali Shire maqaalkiisa uu ugu magacdaray "**Ul qaloocani Hoos toosan ma yeelato"** mar uu ka hadlayay dhibta ummadda Soomaaliyeed ay ku hayaan shaqsiyaadka fara ku tiriska ah ee ku dul nool dadka dhiigooda, waxa uu yiri; "**Waxay na badeen waxay na bareen baa ka daran!"** Isaga oo hadalkiisa sii watana waxa uu yiri; "**Gaajadda, faqriga, umul-raaca hooyooyinka, carruurta u saqiiraysa biyo la'aan iyo tallaal la'aan, jirrooyinka ka dhashay sunta lagu aasay Soomaaliya, dayaca iyo daryeel li'ida ka muuqda xarumaha caafimaadka iyo waxbarashada, burburka ka muuqda kaabayaasha dhaqaalaha sida waddooyinka, dekadaha, garoommada diyaaradaha iyo xarumaha muhiimka ah, waxaa ka daran dhaqanka xun ee dadkeennu aqbaleen. Waa dhaqanka, meeshii la ceebayn lahaa, laga fogaan lahaa, ummadda laga dhex sooci lahaa, dadka ku dul nool dhiigga ummadda, dadka dalkii iyo dadkii iibsaday, kooxda aan waxba hanbayn, dadkii oo dhammi wanaag iyo qurux u arkeen".**

Hubaashii, Qof walba oo Soomaali ah waxa uu si wayn ula socdaa, ogaanshana u leeyahay dullinka siyaasiga isku magacaabay, ee ku nool dhiigiisa; isla-markaana fududeeya fididda feyraska dilaaga ah ee qabyaaladda!

Haddaba, si looga baxo arrinta dhibaatadeeda waxaa lagama maarmaan ah in la helo hoggaan; tusiye iyo toosiyeba u noqda ummadda si ay uga baxaan dhibaatadan, Sida uu soo guurinayo (Shire 2013) "***heerka horummar ee waddan, tayada nolosha shacab, degganaanshaha***

Telegramka @somalibooks

siyaasadeed ee waddan, isjacaylka bulsho, sumcadda dal iyo dad, heerka maalgelimaha lagu samaynayo waddan, heerka shaqo abuurista, iwm, gallada Eebbe (sw) ka gadaal, dhammaan, waxay ku xiran yihiin hoggaamiyayaasha u kaca ummaddaas", Haddaba innaga aaway hoggaankeenii?, Maxay ku maqan yihiin? Mise dad hoggaan soo saaray ayeynaan ahayn?, Waxaan qabaa su'aalahaas in jawaabtoodu ay tahay, haa hoggaankeenii waa joogaa, laakiin waxaa ku dhacay halka Soomaalidu ka dhahdo "***Biyo kaa badan iyo Dadkaa badaniba way ku hafajiyaan***" oo ah in afduub lagu haysto maskaxdii soo dhiraandhirin lahayd garashada guriga sannada wanaagsan u rari lahayd ummadda, ka dib markii ay haleeleen oo ay weerareen qalbiyadooda ***QABYAALAD, JAHLI, IYO GAAJO*** oo ay mar walba la kulmaan bahdil nololeed iyo mid bulshadeedba.

Soomaaliya waxaa maanta la sheegaa in ay leedahay jiil aad u ballaaran oo dhallinyaro ah, una dhexeeya 15-40 sanno, midaas oo muujinaysa in ay heysato cudud aad u ballaaran oo shaqaalle ah, haddii ay helaan hoggaan garasho, indho dheeri iyo xikmadba leh oo yaqaanna halka uu ku furayo bahdiisa Soomaaliyeed, ayna dhaci karto in ay wax badan ka badalaan nolosha bulsho, dhaqaalle iyo horumarka wadan. Sidaa darteed, Soomaaliya maanta waxa ay u baahantahay dhallinyaro ka madaxbannaan; saafina ka ah cudurka Qabyaalada, dhallinyaro sidii SYL qabata gacanta ummadda Soomaaliyeed, oo ka soo saarta godka ay ku dhacday, dhallinyaro aragtida iyo yoolka mustaqbalka ay hiigsanayaan ay tahay sidii loogu soo celin lahaa sharaftii, karaamadii iyo dadnimadii ay ku lahayd adduunka dhexdiisa, dhallinyarro ka gilgilata sidii ay isaga roggi lahayd heeryada quruntay ee uu dhaxalsiiyay **DILAAGA DAHSOON**.

Robert F. Kennedy (1966) isaga oo khudbad ka jeedinaya furitaankii jaamacada CAPE TOWN ee ku taal Koonfurta Africa, waxa uu yiri; **"Aduunku waxa uu ubaahan yahay dhalinyaradiisa; ma aha oo qura xili nololeed laakiin xaalad maskaxeed, Dareen Rajo qaba, leh tayo wax lagu curiyo, awood Geesinimo oo looga hortago cabsida Mustaqbalka iyo uhaynta han loogu babac-dhiggayo khatarta safarka fududeynta nolosha"**. Haddaba, si loo gaaro horumar bulsho, dhaqaalle iyo siyaasadeed oo ka hanna-qaada wadanka Soomaaliya, waxaan lagama maarmaan ah, waa in la helaa dhallinyaro Soomaaliyeed, hormo iyo hayb kasta oo ay ku hoos jirtaba u dhaqaaqda inay dhex marto ummadda Soomaaliyeed gayigeeda oo idil, isla mar ahaantaana ka madaxbanaan saamayn kasta oo uu ku yeelan karo siyaasiga madaxda u ah **Jabadbaasland** iyo himilooyinkiisa shaqsiyeed, kuna dhiirrata, una babac-dhigta khataraha cabsida leh ee mustaqalku huwan yahay.

Gabogabo:

Waxa aanu nahay ummad illaahay galladiisa ku siiyay diinta xaqa ah ee maanta caalamka ka jirta, Allena Raali ka yahay, sidaa darteed, marka hore, waxaa inna hudha oo lagama maarmaan ah in aan Alle u tawbadkeeno, iyadoo uu qof walba ka bilaabayo naftiisa, lana imaanayo shuruudaheeda, marka xiga, waa in aan guntiga dhiisha isaga dhignaa, oo aan wadankeena dhibta ka saarno, innaga oo u ogolaanayna; una diyaarinayna dhallinyaradeena heer ay hannan karaan hoggaanka wadanka.

Telegramka @somalibooks

Marka xigga, War dhallinyarooy cidda maanta ay wax ka lumayaan waa innaga, Nin dantiisii adduunyada ay kasoo idlaatay, oo ah **qorrax casar joogta** yaynaan nolosheena u baabi'in.

Marka xigga waxaa mid walba oo hooyo iyo Aabe Soomaali ah dhaleen, oo damiirkiisu noolyahay mas'uuliyadi ka saarantahay in uu ku barbaariyo ilmihiisa in uu yahay muwaadin Soomaaliyeed, wadankiisuna yahay Soomaaliya, xerada iyo xudduudan loo jeexayna uu leeyahay mid ka ballaaran, dadkiisuna intaan ka badan yahay, Qabiilkiisuna uu yahay Soomaali, wax ka sokeeyana uu san jirin.

Ugu danbeyntii, waxaan halkan fariin ugu gudbiynayaa, ninka siyaasiga sheegtay, ee aan aamisanahay inuu dhiigayga quuto maalin walba, waxaana usoo jeedinayaa in uu Alle ka cabsado; ugana cabsado Mas'uuliyadda uu qaaday, waxaana ku soo xoorinayaa erayadan oo aan kula hadlayo guud ahaan ummadda Soomaaliyeed:

Dadkeygiiyow! Dalkaygiiyow!
Dunidu way horumartoo
Daruustii cilmiga iyo
Diktoorbay qaadatoo
Dayaxa guudkiisa bay
Degmooyin ka yeelatoo
Midaynta Dantooda bay
Daraasiin Yurub ahoo
Dubkiyo Afkiyo Hiddaha
Dhammaantood is Doorsha bay
Dariiq qudha inay marraan
Marna ay ka Daalinee
Innana Daacadii Illaah
Dayuus ay garashadiyo
Damiirkiis uu dhintaan
Durbaan aan u tumahaynaa
Diktoor been been ah iyo
Wadaad Diintii Illaah
Dariiqeed ka weecday baan
Durbaan aan u tumahaynaa
Dubaaqdii Garashadiyo
War miyaynaan damiir lahayn?

Copyright©orsheyare2014

MAHADSANIDIN